

# Barnaamijka qoysaska guusha gaaray

Luulyo 2003

Barnaamijka qoysaska guusha gaaray wuxuu adeegyo u hayaa qoysaska dan yarta ah ee ay ka mid yihiin kuwa soo socda:

- Caawimo lacageed, oo loo yaqaano caawimada ku meel gaarka ee qoysaska (TAF)
- Caawimada dadka waaweyn si ay shaqo u helaan
- Adeegyada taageerada dhanka tababarada shaqo, howlaha shaqo, iyo wax barasho.

Barnaamijku wuxuu qoysaska ka caawiyaa inay koroto xirfadooda, ay wax ku qabsadaan xoogooda, caruurtoodana ugu haystaan gurigooda.

Si aad uga heshid caawimo Successful Families, qoysku waa in ay leeyihiin ugu yaraan hal cunug oo ka yar 18. Cunugu wuxuu kaloo noqon karaa cunug aan wali dhalan. Cunugu wuxuu la noolaan karaa waalid ama qaraabo. Wuxuu kaloo ilmuhu la noolaan karaa qof ay maxkamad u magacawday inuu xanaaneeyo ilmaha, sida mas'uul, ilaaliye, ama hayye.

Qoysasku waa inay sidoo kale yihiin kuwo dan yar ah ama hanti yar. Dakhliga carruurta guriga oo dhan iyo waalidaba waa la xisaabayaa. Dakhliga qaar lama tiriyo sida kuwaan:

- Guriga uu qoysku degan yahay
- Hantida ka yar \$2,000
- Baabuurta
- Qalabka guryaha, waxyaabaha qofku isticmaalo, iyo qalabka qaar.
- \$90 lagu daray 40% dakhliga ah

Qoysasku waxay heli karaan caawimo lacageed intay shaqo raadinayaan haddii ay barnaamijka shuruudiisa ka soo baxaan. Waxaa ka mid ah in ay la shaqeeyaan waxyaabaha uu ka doonayo barnaamijka taageerada carruurta (Child Support) Qoysasku waxay heli karaan TAF 60 bilood intay noolyihiin. Qoysaska qaata TAF waxaa kaloo la siiyaa kaar caafimaad waxayna heli karaan haynta caruurta.

Heerka caawimada lacagtu wuxuu ku xiran yahay dakhliga qoyska. Heerka lacagtu wuxuu kaloo ku xiran yahay degmada uu qoysku ku nool yahay. Shaxanka hoose wuxuu muujinayaa lacagta ugu badan ee qoys heli karo.

Cash Assistance Payments				
Tirada Qoyska	Degmada baadiyaha	Baadiye qali ah	Degmooyinka dadka badan	Meel dad badan oo qaali ah
1	\$224	\$229	\$241	\$267
2	\$309	\$314	\$326	\$352
3	\$386	\$391	\$403	\$429
4	\$454	\$459	\$471	\$497
5 ama ka badan	Ku dar \$61 qofkii dheeraad ahba			

Qoysasku waxay heli karaan noocyo kale oo adeegyo taageero ah oo yaraynaya caqabadaha inay shaqaystaan. Qoysasku way heli karaan adeegyadan taageerada ah inta ay qaadanayaan lacagta caawimada ah iyo hal sano ka dib markay ka baxaan qaadashada lacagta cawimada ah. Qoysasku waxay heli karaan adeegyo iyo taageero kala duwan oo ay ka mid yihiin kuwa hoos ku qoran:

Adeegyo dadka barashadu ku adagtahay, dhibaataada daroogada iyo khamrada, ama dhibka qoyska

Adeegyo laga caawinayo aqriska iyo xisaabta

Adeegyo caafimaadka dhimirka

Daryeelka caafimaadka jirka

Caawimo si aad ula qabsatid curyaanimo

Caawimo si aad u heshid una haysatid shaqo

Caawimo inaad ilmo korsatid

Caawimo in lagu geliyo ilko, ookiyaale, qalabka maqalka

Tababar shaqo

Caawimo inaad qaadato GED ama Ingiriis baratid

Khibrad shaqo

Caawimo inaad tagtid goobaha shaqada

Dharka

Caawimo baahida daruuriga ah

Kharashka guuritaanka ee shaqo ku taxaluqa

Dadka waaweyn ee ka yar 60 waa inay sameeyaan waxyaabahaan mid ka mid ah si ay lacag qoyskooda ugu helaan:

Shaqeyaan ama ku jiraan hawl shaqo

In ay ku jiraan barnaamijyo yaraynaya caqabadaha shaqo

In ay xanaaneeyaan ilmo ka yar 12 bilood

In ay xanaaneeyaan qof curyaan ah oo qoyska ka tirsan

Dadka aan laga doonaynin inay shaqo helaan ama hawl shaqo ku jiraan waxay dalban karaan adeegyo.

## Arjiyaasha

Halkan Riix si aad u heshid arjiyaasha adeegyadeena.

Wixii adeeg kale ah ama si aad u heshid Xafiiska Bulshada iyo Dib-u-dhiska ama Access Point kan kuugu dhow, isticmaal xariirada ku yaalla boggan dhamaadkiisa.

Ku noqo bogga EES

Bogga waxa la habeeyay Sebtember 16, 2004